


# Solving Problems at School



## Dhibaatooyinka dugsiga lagu xallivaa

Mararka qaarkooda waalidiintu waxay u baahany-iihin inay macallimiinta kala hadlaan hawlahu dugsiga, xiriirka ilmahoodu ay la leeyihii ardeyda kale ama baahida gaarka ee ilmahooda. Macallimiinta badankooduna waxay waaliinta ka caadeysteen inay su'aalo noocan oo telefonoonka lagu weydiyo iyo macallimiinta oo jecel inay ilmihina ku caawiyaan guusha dugsigooda.

### Waalidiinta oo xubno muhiim ka ah Waxbarashda

Ontereeriyo, waalidiinta waxaa lagu dhiirigalinaya, inay qeyb libaax ka qaataan waxbarashada ilmahooda. Hadda waxaa jira Wasaaradda Waxbarashada qeyb ka mid ah oo heegan u ah inay waalidiinta gacan u fidyaan, si ay uga qeyb galaan Waxbarashada ilmahooda iyo dugsiyada bulshadaba.

Haseyeeshe, qaabkani mararka qaarkooda, waxaa laga yaabaa inuu ka dhasho jihawareer. Ayaad la hadli haddii aad su'aalo ama dhibaato qabtid?

Haddii aad rabtid in aad macallimiinta telefoon kula hadashid, xafiiska dugsiga wac, farriina u dhaaf, Macallinka ayaa ku soo wici doona.

Haddii aad doonaysid macallinka in aad la kulantid, xafiisduka dugsiga wac oo fariintaadana ugu sheeg in aad rabtid in ballan laguu dhigo si aad macallinka ula kulantid. Haddii aad u maleynaysid in ilmaahagu gargaar dheeraad ah ama barnaamij gaar ah uu u baahanyahay, markaas waxaad dalban kartaa in aad macallinka iyo xubnaha kale ee dugsiga la shirtid. Dugsiyada qaarkoodu waxay idin heli karaan turjubaano.

Halkan waxaa ku yaala arrimo dhowr ah oo idin ku kaalmeynaya marka aad la hadlaysaan shaqalaha dugsiya:

### Ilmihina la hadla

- ilmihina su'aalo weydiya, si ay idin ku kaalmeysa in aad xogwaraan uga heshaan
- Wuxuu isku deydaan in aad “su'aalo guud” weydiisaan, sida, “Arrimaha ku saabsan ee dhibaatada ku ah...?” “Waxa dhacay ii sheeg...?
- Waxa uu idin sheegaya/so, ka dhageysta, su'aalo dheerad ahna weydiya.

### Macallinka ilmihina la sheekeysta

- waxaad daneynaysaan iyo dareenka ilmihina Macallimiinta kala hadla.
- Isku daya faalo in aad hadalka ku bilowdaan, sida, “ilmahaygu wuxuu ii sheegay...”
- Su'aalo weydiya, si aad wax uga fahamtaan nidaamka iyo qaab dugsiyeedka.
- Talooyinka iyo aragtida macalinka/da si fiican u dhageysta.
- Idinka iyo macallimiintu waxaad qaban laheydeen ka wada sheekeysta, si ilmihin dareen isku wada mid ah uu idin ka qaato.
- Arrimaha macallinku/du idin sheegay/tay si aad uga baaran degtaan wakhti badan ku qaata. La idin kama baahna, isla markaaba in aad go'aan ka gaadhaan.
- Isla meel dhiga mar kale in aad kulantaan, haddii wax qabdkiiuu uu noqday wax ku ool.

### Maamulaha ama Maamule ku xigeenka la hadla

Haddii macallinku/du ayna awoodi Karin inay idin kaalmeeyo/so, maamulaha ama maamule ku xigeenka la hadla. Waxaa laga yaabaa inay si toos ah idin caawiyaan ama macallin kale ama shaqalaha dugsiga mid ka mid ah arrintiina u xilsaaraan.



# Solving Problems at School

## Masuulka gaarka ee dugsiga (Superintendent) la hadla

Dhibaatadiinu haddii ay intaas ku dhammaan weydo, waxaad la xiriirtaan, Masuulka gaarka, si uu/ay idii cawiyo/so.

### Waxaad xasuuusnaataan:

- Xog-ogal noqda; u kuur gala nidaamka dugsigiina
- Dhacdooyinka dugsiga iyo iswareysiga macallimiinta iyo waalidka, si joogta ah uga qeyb qaata. Wuxaan sahan in dhibaatada aad xalisaan markaad macallimiinta la kulmaysaan.
- Shir kasta oo dugsigu idin ku marti qaado oo ku saabsan ilmihiina ka qeyb qaata. (tsle. Waxbarashada gaarka, Barnaamijka Waxbarashada Gaarka (IEP), Eedaabta dugsiga.
- Dhibaatadiinu haddii ay tahay mid si sahan looga sal gaaraynin, qoraal ku keydsada arrimaha shirarka muhiinka ah iyo wada hadaladiina.

- Haddii luqadda Ingiriiska aadan ku wanagsaneyn, waxaad dalbataa turjubaan.
- Dareenka danha ilmihiina ku saabsan wuxuu noqon karaa mid murugeysan. Isku daya in aad isdajisaan. Dadku waxay u badan yihiin kuwa dareenkiina idin ka dhageysta haddii si deggan aad wax ugu sheegtaan.

### Xogwarran dheeraad ah:

- Waca ururka “People for Education” 416-534-0100 ama waxaad raadsataan koobiyo tusaalooyinkan / qoraalkan oo luqado kale ah: [www.peopleforeducation.com](http://www.peopleforeducation.com)
- Wuxaan booqataan: shabaqadda Internetka Wasaaradda Waxbarashda: [www.edu.gov.on.ca](http://www.edu.gov.on.ca)
- Wuxaan booqataan: [www.settlement.org/edguide](http://www.settlement.org/edguide), si aad udaawataan fidiyow iyo xogwarran oo luqado kala duwan ah.